
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Daanyeel iyo Bohoshii Libaaxyada

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay


Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Dariyus wuxuu ahaa boqorka cusub ee Baabuloo. Wuu caqli badnaa. Wuxuu ka soo dhex saartay boqol iyo labaatanka ugu fiicnayd dadka boqortooyadiisii inay caawiyaan xukunka. Dabadeedna waxa uu ka sii dhex xushawy saddex u sii xil saaran.




Daanyeel wuxuu ka mid ahaa saddexdaa nin midkood.

Boqor Dariyus aad buu u ixtiraami jiray Daanyeel, wuxuuna ku fikirayay inuu isaga ka dhigo ka ugu sareeya xukuumadda boqortooyada.



Hoggaamiyayaashii kale way ka hinaaseen. Waxayna qorsheeyeen inay u yeelaan khaladaadyo Daanyeel si ay ugu helaan Daanyeel dhibaatooyin cilado ka soo gaara xagga boqorka.




Micno ma samaynayso siday isugu dayeen, sarakiishan wayeen sabab iyo xumaan toona ku saabsan Daanyeel. Daanyeel wuu ku saxnasanaa wax walba uu u sameeyo boqorka. Weliba, wuu taxadar iyo caqli badnaa, oo marwalba wuxuu samayn jiray waxa ugu wanaagsan ee uu karo.



Saraakiishii hinaasanayd waxay garanayn un keliya inay jirto waddo lagu gacangalin karo Daanyeel. Waxay kale oo garanayeen inaysan jirin dunidan dusheeda wax ka joojin kara isaga caabudiddda Ilaaha Israa'iil.







Cadowyadii Daanyeel waxaa u soo baxay fikirkoodii qorshe. Waxay u sameeyeen sharci cusub boqorka inuu saxiixo. Sharcigaa wuxuu odhanayaa cidwalba waa inay baryo wax ku weyddiistaa boqor Dariyus keliya. Ku kii kale ee addeeci waayo waa in lagu tuuraa bohosha libaaxyada.

Boqor Dariyus wuu saxiixay
sharcigii cusbaa.




Sharcigii cusbaa ku samaynin isbedel Daanyel. Wuxuuna samaynayay wixii uu marwalba samayn jiray un. Wuxuu ku jilba joogsan jiray daaqadda furan ee qolkisa maalin walba saddex jeer, oo baryi jiray Ilaaha samada.





Saraakiishii hinaasanayd waxay ku ordeen boqorka si ay ugu sheegaan.



Boqor Dariyus doorasho ma uusan lahayn laakiinninuu Daanyeel xidho mooyaane. Sharciga waa in la yeelaa. Daanyeel waa inuu dhintaa.


Boqorkii way ku adkaatay, laakiinse ma jirin waddo kale oo u banaanayd oo lagu bedeli karo shrciga.

Daanyeel waxaa lagu xukumay xukunka ah in lagu rido oo uu ku dhinto bohoshii libaaxyada. Intii ka horreysay markii Daanyeel lagu tuuri lahaa bohoshii libaaxyada baahnaa, boqor Dariyus baa la hadlay oo ku yidi isaga, "Ilaahaaga aad had iyo goorba u adeegto ayaa ku samata bixin doona!"



Boqorkii habeenkaa ma uusan seexan. Aroortii hore dambee ee xigtay, ayuu ku soo cararay bohoshii libaaxyada.






Boqr Driyus wuxuu ku soo qayliyay, "Daanyeelow, Ilaaha nool midiidinkiisow, Ilaahaga aad had iyo goor u adeegto ma awoodi karaa inuu libaaxyada kaa samata bixiyo?" klaga yaabe inuusan ka filynaini jawaab!

Daanyeel baa
ka soo dhawaaqay
godkii, "Alla boqorow,
Ilaahayga ayaa ii soo diray
malaa'igtiisa, oo waxay xidhay
libaaxyada afkoodii, oo waxba
ma ay i'yeelin!  Oo weliba,
xagaagana boqorow
waxba kuma
aan yeelin."




Boqr Dariyus aad iyo aad buu u farxay!  Wuxuuna amr ku bixiyey in dibadda looga soo saaro godk.



Boqorku wuu ogaa in Ilaah soo samata bixiyey Daanyeel oo Daanyeel cadowyadiisa yihiin cadowga Ilaah. Amarna wuxuu ku bixiyey dhamaan kuwii khiyaamay ee saxiixay sharcigii xumaa in lagu wada tuuro godka libaaxyad dhamaantood.



Boqor Dariyus wuxuu doonay inay dunida ogaato in Ilaaha samada uu difaacay addoonkiisa daacadda u ahaa, Daanyeel. Boqrkii wuxuu qoray warqad uu ku amrayo qofwalba inuu caabudo Ilaaha nool. Oo boqorkii wuxuu dib u soo ceshaday Daanyeel oo xishmo iyo hoggaamin isugu daray.



Daanyeel iyo Bohoshii Libaaxyada

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Daanyeel 6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16